

## Ku dhaqanka Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiga Xorta ah ee Jamhuuriyada Federaalka ah ee Jarmalka

Si aad u codsato ogolaanshaha daganaanshaha ee ku cad qaybta 104c, farqada 1, jumlada 1, lambar 1, ee sharciga Aufenthaltsgesetz (AufenthG – Sharciga Daganaanshaha, Shaqada Dhaqaalaha iyo Daganaanshaha Dadka shisheeyaha ah ee Sharciga Daganaanshaha Dhulka Federaalka)

- 1) Waxaan daacad u noqonayaa Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiga Xorta ah ee Jamhuuriyada Federaalka ah ee Jarmalka. Si gaar ah, waxaan qirayaa waxyaabaha soo socda:
  - a) Dadku waxay xaq u leeyihiin inay doortaan maamulka dalka ayagoo u maraaya
    - doorashooyinka iyo codbixinta,
    - laamaha sharci dejinta, fulinta iyo garsoorka.Dadka ayaa doorta wakiillada dadwaynaha ayagoo adeegsanaaya waraaqda codbixinta guud, tooska ah, xorta ah, loo siman yahay ee qarsoodiga ah.
  - b) Sharci dejintu waxay ku dhaqmayaan dastuurka. Awooda laamaha fulinta iyo garsoorka ayaa waafaqsan sharciga iyo cadaalada.
  - c) Mucaarad kamid ah baarlamaanka ayaa la samayn karaa laguna shaqayn karaa.
  - d) Dawlada waa in ay kula xisaabtamaan talaabooyinka ay qaado wakiillada umadu. Dawlada ayaa xilka laga tuuri karaa inta loo codeeyo lana badeli karaa.
  - e) Maxkamaduhu waa madax banaan yihiin.
  - f) Xukun kasta oo ku yimaada xoog ama fikir shaqsi ah waa mamnuuc.
  - g) Xuquuqda aadanuhu waa lama taabtaan.
  - h) Sharciga Guud ayaa damaanad qaadaaya sharafta iyo sinaanta dhammaan aadanaha. Fal kasta oo abuuraaya Nacaybka Yuhuuda, isir nacayb, nacaybka dadka wadamada kale ama falalka kale ee kasoo horjeeda banii'aadanimada waa sharci daro waxayna lidi ku yihiin balanqaadkaan.
- 2) Waxaan shaacinayaa in aanan ku dhaqmayn ama taageereyn wax kamid ah dedaallada soo socda, oo aan horey u samayn sidaas:
  - a) dedaallada looga soo horjeedo Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiyada Xorta ah, jiritaanka ama amaanka Federaalka ama Gobal, ama
  - b) kuwa lagu beegsanaayo in sifo sharci daro ah lagu wiiqo shaqada dastuuriga ah ee haayadaha dawlada Federaalka ah ama kuwa Gobal ama xubnaha haayadaha dawlada, ama
  - c) falalka khatar gelinaaya masaalixda dibada ee Jamhuuriyada Federaalka ah ee Jarmalka ayadoo la adeesanaayo falal xoog ama falal horseedaaya talaabooyinkaan, ama
  - d) looga gol leeyahay falalka nacaybka yuhuuda, isir nacaybka, nacaybka shisheeyaha ama fal kale oo ka dhan ah bani'aadanimada.
- 3) Waxaan helay, akhriyay aana fahmay 'Waraaqdaan xogta ee Ku saabsan Nidaamka Aasaasiga ah ee Dimuqraadiyada Xorta ah'.